

Waxbarasho waanagsan in ey helaan ardeyda wadanka ku cusub dhammaan shaqaalaha dugsiga baa mas' uul ka ah

Baaritaankii waxaa lagu arkay:

- Dugsiga ma u qorsheynaayaan, ma hirgalinaayaan iyo ma ku waafajinaayaan waxbarashada ardeyda wadanka ku cusub baahidooda iyo awoodooda ilaa intii suurtagal ah.
- Dugsiga si aad u yar buu uga shaqeeyaa arrinta in ardeyda awoodooda ku kalsoonaadaan, xiiso galin iyo saameeyn.

Daraasad sameeyn wanaagsan iyo qorsho guud

Ardeyda wadanka ku cusub ma ey helaan waxbarasho ey ka muuqato xiiso galin, daandaansi iyo ardeyga lagu waafajiyay ilaa intii suurtagal ah.

Ardeyda wadanka ku cusub waayo aragtinimadooda iyo aqoontooda markey noqoto maadooyinka weey kala duwanyihiin markey bilaabaayaan dugsiga iswiidhishka. Dugsiyada qaarkood weey isku dayaan ineey suubiyaan daraasad ku saabsan ardeyga aqoontiisa, laakin dugsiyada midna ma suubiyaan daraasad dhameystiran. Waqtiga koowad uu ardeyga dhiganaayo dugsiga waxaa loo isticmaalaa inta ku badan barashada luqada iswiidhishka oo in yar lee baa maadooyinka kale loo dhigaa. Baaritaanka waxaa ka aragnay caawinaada waxbarashada lagu bixiyo luqada hooyo, meelaha laga helo, badanaa waxbarashada gooni buu ka yahay oo kamid ahaan waxbarashada kale oo ardeyga loo dhigo.

Waxbarashada waxey ku xiran tahay macallinka qaaska ah. Dugsiyada la baaray inta ugu badan ma is kaashadaan, iyo dugsiyada ma siiyaan macallimiinta fursado ey ardeyda wadanka ku cusub waxbarasho fiican ku siiyaan.

Sidey ardeyda wadanka ku cusub waxbarasho wanaagsan u helaan waxey dugsiyada ubaahanyihiin:

Waa in bilaawga la suubiyaa daraasad dhameystiran oo ku saabsan aqoonta iyo waayo aragtinimada ardeyga.

Waa in waxbarashada lagu waafajiyo natiijada daraasada ka soo baxdo.

Waa in ardeyda wadanka ku cusub la siiyaa caawinaada waxbarashada lagu bixiyo luqada hooyo ey ku rabaan.

Waa in la soo saaraa qorsho guud. Barashada luqada dhammaan maadooyinka baa lagu barankara, dhammaan macallimiinta waa in ey ahaadaan macallin luqadeed.